### Kharashka iyo qiimo dhimis

Dhamaan xanaanooyinka caruurtu waxay leeyihiin qiimo bileed isku mid ah. Qiimahaasoo sanadwalba xoogaa wax laga bedelo. Waxaad ka hubin kartaa qiimaha sanadkan bogga mareegta degmeda ama nalasoo hadal si aad u heshid macluumaad dheeraad ah.

Waxaad lacag bixinta bilaabi doontaa kolka caruurtu xanaanada kuu bilaabaan. Waxay xanaanooyinku ku kala duwan yihiin kharashaadka cuntada, xanaanooyinka qaarkoodna waxay qaadaan deebaaji.

**Cidwalbaa way awoodaa kharasha xanaanada caruurta!** Waxaa macquul ah in la codsan karo qiimo dhimis hadii dakhliga qoysku ka hooseeyo xaddi cayiman. Hadii qoyska dakhligiisu ka yimaado NAV halkaas ayey ka codsan karaan in laga taageero kharashaadka xanaanada caruurta. Haday kuu tagaan xanaanada laba caruur ah iyo wixii ka badan kama bixindoontid qiime buuxa dhamaantood. Eeg:

Se: www.sandefjord.kommune.no.

## Waad nalasoo xidhiidhi kartaa hadii aad ubaahatid macluumaad intaa dheer ama aad u baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta codsiga xadaanada caruurta.

**Degmeda Sandefjord, telefon: 33 41 60 00**

www.sandefjord.kommune.no

SANDEFJORD KOMMUNE

**SOMALI**

# Kusoo dhawoow xadaanada caruurta ee Sandefjord!

**Xiliga ugu danbeeya ee codsiga 1. maarso**



**Sharciga xanaanooyinka caruurta, §1:**
«xanaanada caruurtu iyadoo wada shaqayn iyo isfahan la leh guriga waa inay dabooshaa baahida ilmaha ee xanaanayn iyo ciyaareedba, iyo horumarinta aqoon iyo tarbiyadeed oo aasaas u ah koritaan dhamaystiran».

**Norway in kudhow 92% caruurta da'doodu u dhaxayso 1-5 sano waxaa la geeyaa xanaanada caruurta. Qaybta caruurta luuqadaha dhowrka ah leh ee xadaanada caruurta tagaa wayka yar yihiin intaa, waana qiyaastii 81%. waajib ma aha in caruurtu xadaanada tagaan, balse waxaa loo arkaa in xadaanada caruurtu tahay salaanka koowaad ee waxbarashada.**

## Gundhig wanaagsan oo dugsiga lagu bilaabo

Xadaanada caruurta waxay caruurtu ku ahaan karaan kuwo firfircoon oo ku ciyaara jawi aamin ah. Islmarkaana waxaanu ilamaha kasoo dhisnaa aasaaska si bilowga dugsigu ugu fududaado.

Cilmi baadhis ayaa muujisay in caruurta luuqada dhowrka ah leh ee tagi j iray xadaanada caruurtu kaga fiican yihiin dugsiga kuwa aan xadaanada caruurta soo marin.

**Caruurta ay luuqadooda hooyo ahayn norweji muhiim ayey u tahay inay norweji fiican bartaan kahor inta aanay bilaabin dugsiga, waxayna taasi qaadan kartaa sanado badan, s idaa awgeed ayey muhiim u tahay in ilmuhu xili hore bilaabo xadaanada caruurta.**

Waxaa ilmaha u wanaagsan in waalidku caruurta kula hadlaan luuqada ay iyagu ku wanaagsan yihiin. Xadaanadu waxay ka kaalmayneysaa caruurta inay horumariyaan luuqadooda hooyo iyo norwejigaba, iyadoo la adeegsanayo ciyaar, wax isla qabad guud iyo kooxo luuqadeedyo.

Waxaanu aqoon u leenahay kobcinta luuqada caruurta, waxaanuna si qoto dheer u ogaandoonaa luuqada ilmaha iyo dhaqanka ilmuhu kasoo jeedo

## Wada shaqaynta waalidka iyo xadaanada

Wada shaqaynta u dhexaysa xadaanada caruurta iyo gurigu waa inay ahaataa mid ku salaysan kalsooni iyo furfurnaan.

Waxaanu waalidiinta uga qaybgelinaa hawlaha xanaanada anagoo adeegsanayna kulamo khaas ah iyo xidhiidh maalmeedka joogtada ah, waxaa intaa sii dheer shirarka waalidiinta iyo warbixino qoraal ah.

Xadaanada caruurtu waxay waalidiinta uga warbixisaa firfircoonida ilamaha ee xanaanada, horumarka ilmaha iyo wixii caqabado ah ee jira. Waxaanu kaloo bixinkarnaa talooyin iyo jihayn oo aanu siino waalidiinta ubaahan ee dalbata.

## Bilowga iyo laqabsiga

Xanaanooyinka Sandefjord waxay leeyihiin nidaam wadaag ah oo loogu talo galay xiliga hore ee ilmuhu bilaabayo xanaanada.

Dhamaan caruurta iyo waalidiintuba waxay helayaan macluumaad ku saabsan xanaanada, qoyskuna waxay heli doonaan qof xidhiidhiye u ah oo ilmahaa si gaara ula socda.

Ilme kasta waa la tixgelinayaa waana la maqlayaa wuxuuna uga faa'iidooysan doonaa xadaanada qaabka ku haboon xaaladiisa.

## Boos wanaagsan

Degmeda Sandefjord waxaa ku yaala qiyaastii 60 xanaano caruureed. Xanaanooyinku waxay leeyihiin maamule, macalimiin, shaqaale aqoon takhasus ah leh iyo kalkaaliyeyaal. Dhamaan xanaanooyinka caruurta ee dalka Norway waxaa lagu dhaqaa xeerka xanaanooyinka caruurta.

Sida ku xusan qorshaha qaab dhismeedka qaran ee qeexaya in waxqabadka xanaanooyinka caruurta ku salaysnaadaan qiimeyaasha kala ah: Dimuqraadiyadda, kala duwanaanta iyo is ixtiraamka, sinnaanta, horumarka, caafimaadka, isku filaanshaha iyo maareynta nolosha.

Waxay caruurtu maalintii ka qaybqaataan wada ciyaaris iyo waxqabadyo kale oo xadaanada gudeheeda iyo banaankeedaba ah, xiliga cuntada oo la wada fadhiisto, waxqabadyo kooxo kooxo ah, heesid iyo saacadaha akhriska iyo waxqabadyo kale uu mawduucyo ku salaysan.

Waxay caruurtu waxka ogaandoonaa diimaha, dhaqamada iyo ciidaha kala duwan, iyadoon taasi ahayn dabaaldeg diimeed ama diin baris.

**Halkan waxaa ku xusan qaybaha aqooneed ee xadaanada caruurta:**

- Xidhiidh, luuqad iyo qoraal
- Jidhka, dhaqdhaqaaqa, cunto iyo caafimaad
- Farshaxan, dhaqan iyo hal abuur
- Bay'ada, deegaanka iyo farsamada
- Tirada, qol/mug iyo qaab
- Anshax, diin iyo falsafada
- Deegaanka dhow iyo bulshada

## Codsi boos xanaanada caruurta

**Xili codisyeedka ugu danbeeya ee xanaanada caruurtu waa 1. maarso sanad kasta.**

Xanaanooyinka caruurta ee Sandefjord waxay wadaagaan foom codsi oo mareegta laga isticmaalo.

www.sandefjord.kommune.no/skole-og-barnehage.

Boga mareegta waxaad kaloo ka heli kartaa khariidada xanaanooyinka iyo macluumaad kooban uu ku saabsan xanaano kasta. Waxaad kaloo awoodaa inaad wacdid xanaano kasta si aad u heshid macluumaad dheeri ah ama aad ka balansatid balan booqasho.

**Ilmo kasta oo loo codsaday boos xanaano ka hor xiliga ugu danbeeya ee codsiga 1. maarso, wuxuu xaq u leeyahay inuu boos helo xili dayreedka isla sanadkaa, hadii uu buuxinayo hal sano kahor 1 disember isla sanadkaa.**

Marka ilmahaagu boos helo, waxaad heli doontaa macluumaad ku saabsan qaabkuu ilmuhu u bilaabi doono. Ilmahaagu wuxuu booskaas sii wadan doonaa ilaa uu dugsi ka bilaabayo ama ilaa uu waalidku booskaa fasaxo oo uu ilamaha xadaanada ka saaro.

Weli waad codsan kartaa boos xanaano xataa ka dib 1. maarso, laakiin markaa waxaad sugaysaa in mudo ah inta uu boos ka banaanaan doono.